

# Suaalaha badanaa ay is weydiyaan kiraystayaasha degan 33 Alfred Street, North Melbourne

20-ka Sebteembar 2024

Somali | Soomaali

## Maxaa maanta lagu dhawaaqay?

Dawladda Victoria waxay ku dhawaaqday goobaha xiga ee dayactirka lagu sameyn doono iyagoo qayb ka ah Mashruuca Weyn ee Guriyeynta Victoria. Goobahani waa:

- 139 Highett Street, Richmond
- 259 Malvern Road, South Yarra
- 6 iyo 8 Anderson Court Richmond
- 1 - 5, 7 iyo 9 Williams Court Richmond
- 111, 119 iyo 127 Elizabeth Street Richmond.

## Warbixintan lagu dhawaaqay maxay aniga iiga dhigan tahay?

Ma jiraan wax isbeddel ah oo ku yimid qorshaha dib-u-dhisika **33 Alfred Street, North Melbourne** sanadka 2031.

Fadlan sii wad inaad la shaqeysa kooxdaada raritaanada si aad u heshid guri cusub oo buuxinaya baahiyahaaga iyo in la dhameystiro guuritaankaaga.

Rarista Flemington iyo North Melbourne waxaa la dhameystiri doonaa **bisha Sebteembar ee sanadka 2025**.

## Sidee bay u ekaan doonaan guryaha cusub ee North Melbourne?

Naqshadaynta guryaha cusub lama dhamaystirin laakiin waxa ku jiri doona guryo bulsho oo casri ah oo sugaran.

Waxaad heli doontaa fursad aad nagula wadaagto ra'yigaaga ku aadan naqshadeynta.

## Xafladaha bulshada ee la imaan karo bilan la'aanta

Waxaa jira shaqaale ka socda Homes Victoria iyo xafiiska guriyeynta ee deegaanka oo heegan ku ah dhismaha **33 Alfred Street** si ay kaaga jawaabaan su'aalo kasta.

Waxaa laga heli karaa:

- 10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Jimcaha 20-ka Sebteembar
- 9-ka subaxnimo ilaa 12-ka galabnimo Sabti 21-ka Sebteembar.

## Sidee ku heli karaa macluumaaad dheeraad ah?

Waxaad ka heli kartaa macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan Mashruuca Weyn ee Guryaha, nidaamka raritaanka iyo qorshayaasha dib-u-dhiska dhismayaasha dhaadheer:

- Ka qaybgal xafladaha bulshada ee la tagi karo bilan la'aan
- **La hadal kooxdaada raritaanada 33 Alfred Street, North Melbourne maalmaha Talaadada iyo Khamiista 10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo**
- La xidhiidh xafiiska guryaynta ee deegaankaaga
- Wac 1800 716 866 si laguugu xiro xafiiska guryeynta ee deegaankaaga (9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha). Turjubaano ayaa diyaar ah haddii loo baahdo
- Booqo websaydkayaga cusub ee bighousingbuild.homes.vic.gov.au halkaas oo aad wax ka waydiin karto kooxdyada rarida
- Email [enquiries@homes.vic.gov.au](mailto:enquiries@homes.vic.gov.au).